



Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Golaha Shacabka

QARAAR GOLAHA SHACABKA
KU SAABSAN
TAAGEERIDDA XAWAALADAHA SOOMAALIDA

Muqdisho, 4th February 2015


A handwritten signature in black ink, appearing to be 'M. H.', located in the bottom right corner of the page.

GOLAHA SHACABKA:

- Markuu Arkay:** Dhibaataada kala soo gudboonaan karto Shacabka Soomaaliyeed joojinta xawaaladaha gudaha iyo dibadda;
- Markuu Arkay:** Ku tiirsanaanta qoysaska lacagaha looga soo diro dibadda in ay tahay qadka noloshooda (lifeline);
- Marku Arkay:** Walaac faraha badan uu shacabka ku abuuray xiritaanka Xawaaladaha;
- Markuu Arkay:** Saaxiibtinimada qotada dheer ee ka dhaxaysa Dowladda Soomaaliya iyo Dowladda Mareykanka iyo labada shacbi;
- Markuu Garowsaday:** Joojinta xawaaladaha in ay keenayso xasilooni darro kana faa'ideysan karaan kooxaha nabad diidka ah;
- Markuu Ogaaday:** In Bankiga (Merchants Bank of California N.A.) uu joogiyay macaamilka xawaaladaha Soomaalida.

Golaha Shacabka wuxuu soo saaray Qaraarkan:

1. Golaha Shacabka Soomaaliyeed wuxuu dawladda Mareykanka ugu mahadcelinayaa taagyeeradda dhincyada Siyaasadda, Amniga iyo Baniadannimada ee uu siiyo Shacabka Soomaaliyeed.
2. Golaha Shacabka isagoo tixgelinaya sharciyada xafiiska ilaalinta lacagaha, wuxuu baaq u dirayaa Dowladda Mareykanka in ay u sameyso mudo dheereyn go'aanka joojinta xawaaladaha ee uu gaarey Bankiga (Merchants Bank of California N.A.);
3. In Xukuumadda Soomaaliyeed si deg deg ah wadahal dhinaca xawaaladaha lacagta ay ula sameysaa Dowladda Mareykanka, hay'adaha lacagta iyo kuwa Amniga.
4. In dhammaan Xawaaladaha Soomaaliyeed ay u hoggaansamaan shuruucda iyo xeerarka ilaalinta nidaamka lacagta ee dalalka ay la macaamilayaan.


M. ne Muxammad Sh. Cusmaan Jawaari
Guddoomiyaha Golaha Shacabka

